# DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

# WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA - BISHA NOVEMBER 2025

JAN 2026

# WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha November 2025

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

## XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

## TUSMADA WARBIXINTA


***HORDHAC ..... 1***

***DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025..... 2***

**DAKHLIGA DAWLADDA BISHA NOV 2025 & 2024 ..... 3**

DAKHLIGA CANSHUURAHA ..... 6

DAKHLIYADA KALE ..... 8

**DEEQAHA DIBADDA ..... 8**

***DHABTA KHARASHAADKA JAN-NOV IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025 ..... 10***

**DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN-NOV, HAY'ADAHA DAWLADDA..... 15**

**KHARASHAADKA JOOGTADA AH ..... 15**

**KHARASHAADKA MASHAARIICDA..... 16**

***Lifaaqa 1aad: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Nov ..... 17***

***Lifaaqa 2aad: Faah-faahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan-Nov, 2025..... 42***

***Lifaaqa 3aad: Soo koobid Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Ee Hay'adaha Jan-Nov, 2025..... 63***


**Liiska Jaantusyada**


Jaantuska 1aad: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Nov 2025 & 2024 ..... 4
Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Nov 2025 & 2024 ..... 4
Jaantuska 3aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Nov 2025 ..... 5
Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-Nov 2025 & 2024 ..... 7
Jaantuska 5aad: Deeqaha Dibadda Jan-Nov 2025 & 2024 ..... 9
Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah, Bilaha Jan- Nov - 2025 & 2024 ..... 11
Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaaciicda ah, Bilaha Jan-Nov- 2025 & 2024 ..... 12


**Liiska Shaxaha**


Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - Nov 2025 ..... 2
Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga Nov 2025 & 2024 ..... 3
Shaxda 3aad: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Nov ee sannadaha 2025 & 2024 ..... 6
Shaxda 4aad: Deeqaha Dibadda Jan-Nov 2025 iyo 2024 ..... 8
Shaxda 5aad: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Nov 2025, ..... 10
Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha November 2025 iyo 2024 ..... 13
Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- Nov 2025 & 2024 ..... 14
Shaxda 8aad: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda ..... 15

**HORDHAC**

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dakhliga dhabta ah ee lasoo uruuriyey iyo kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay miisaaniyad sannadeedka 2025 oo ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka.

Kutalagalka hore ee miisaaniyadda waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah ee ay labada aqalka ee baarlamaanka ansixiyeen oo aan waxba laga badalin, kutalgalka danbe waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah oo lagu sameeyey kala wareejinno miisaaniyadda hay'adaha qaar ama madaxyada miisaaniyadda ee hay'adaha dhexdooda.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2025 ayaa ah **$430M** wuxuuna ka yahay **32%** wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay **$902M** oo **68%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2025.

Wadarta miisaaniyadda asalka ah ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **$628M** waxayna ka tahay **46%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka miisaaniyadda asalka ah kharashaadka mashaariicda ay tahay **$731M** waxayna ka tahay **54%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa Nov 2025 ayaa ahayd **$355M** wuxuuna ka badan yahay **6%** iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Nov 2024. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025 ayaa ahayd **$405M** waxayna ka hoosaysaa **2%** iskubiirinta deeqaha dibadda la helay bilaha Janaayo ilaa November 2024.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025 ayaa ahayd **$756M** waxayna aad ugu dhawdahay wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November ee sannad maaliyadeedka 2024.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doontaa saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dakhliga dhabta iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban yahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey billaha Janaayo ilaa November 2025, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan ee isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2025. Lifaaqa 3$^{aad}$ soo koobid fulinta mashaariicda.

**DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025**

Wadarta dakhaliga ee miisaaniyadda asalka ayaa ah **$1,331,969,583** oo la filaayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2025 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ahayd **$430,341,430** oo **32%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay **$901,628154** oo **68%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2025.

| Faah-Faahin | Bisha Nov | Dhabta Jan-Nov 2025 | Kutalagalka Danbe | % Fulinta |
|---|---|---|---|---|
| **Wadart Guud** | **$186,468,391** | **$784,429,431** | **$1,331,969,583** | **59%** |
| **Wadarta Dakhliga Dawladda** | **$186,468,391** | **$760,297,516** | **$1,331,969,583** | **57%** |
| **Dakhliga Gudaha** | **33,558,905** | **355,335,061** | **430,341,430** | **83%** |
| **Dakhliga Canshuuraha** | 24,339,550 | 254,839,377 | 295,289,259 | 86% |
| Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka | 3,026,514 | 41,243,668 | 38,031,213 | 108% |
| Canshuurta Adeegga & Agabka | 5,555,127 | 62,314,710 | 56,111,497 | 111% |
| Canshuurta Ganacsiga Dibadda | 14,881,984 | 143,403,367 | 186,211,437 | 77% |
| Canshuuraha Kale | 875,924 | 7,877,633 | 14,935,112 | 53% |
| **Dakhliyada Kale** | 9,219,355 | 100,495,684 | 135,052,170 | 74% |
| **DEEQAHA DIBADDA** | **152,909,486** | **404,962,455** | **901,628,154** | **45%** |
| Deeqaha laba dhinaclaha | 912,183 | 17,650,180 | 42,000,000 | 42% |
| Deeqaha Dhinacyada badan | 151,997,303 | 387,312,275 | 859,628,154 | 45% |
| **Iibka Hantida & Daymaha** | - | **24,131,915** | - | **0%** |
| Iibka Hantida | - | 3,631,915 | - | 0% |
| Daymaha Gudaha | - | 20,500,000 | - | 0% |

*Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - Nov 2025*

Shaxda 1aad waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa November iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Wadarta dakhliga la helay bisha Nov ayaa ah **$186.5M**. Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday **$34M** una dhiganta **18%** wadarta dakhliga la helay bisha November, Deeqaha dibadda ayaa la helay **$153M** oo u dhiganta **82%** wadarta dakhliga la helay bisha November 2025.

Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa November ayaa ahayd **$760M** oo **57%** ka ah wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha ayaa lasoo uruuriyey **$355M** oo u dhiganta **83%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Deeqaha Dibadda ayaa la helay **$405M** oo **45%** ka ah miisaaniyad sannadeedka 2025 ee wadarta deeqaha dibadda.

Wadarta dakhliga Iibka Hantida ee la helay bilaha Janaayo ilaa November ayaa ah **$3.6M**, waxaana laga soo wareejiyey xisaabaad bangi oo dibadda ugu furnaa Dawladda wixii ka horeeyey 1991dii. Daymaha Gudaha oo ah **$20.5M,** ayaa horumaris/dayn ay Wasaaradda Maaliyadda kasoo qaadatay Bangiga Dhexe, si loogu bixiyo kharashaad hortabinta u leh Dawladda.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa November dakhli dhan **$41M** oo u dhiganta **108%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey **$62M** oo ah **111%** miisaaniyadda sannadka, waxaa la dhaafay saadaalintii sannadka, waxaana la soo urururiyey canshuur ka badan saadaalinta sannadka 2025. Sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo uruuriyey **$143M** oo u dhiganta **77%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

Dakhliyada kale waxaa la soo uruuriyey bilaha Jan-Nov 2025 dakhli dhan $**100M** oo u dhiganta **74%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa November dakhli dhan **$18M** oo **42%** ka ah miisaaniyadda sannadka 2025, Deeqaha dhinacyada badan waxaana la helay **$387M** oo u dhiganta **45%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

## DAKHLIGA DAWLADDA BISHA NOV 2025 & 2024

Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2$^{aad}$ waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga Dawladdu heshay bisha November ee sannadaha 2025 iyo 2024.

| Faah-Faahin | Dhabta Dakhliga Nov 2025 | Dhabta Dakhliga Nov 2024 | Koror/Naaqus |
|---|---|---|---|
| **Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda** | **$186,468,391** | **$57,632,008** | **224%** |
| **Dakhliga Gudaha** | **33,558,905** | **30,243,588** | **11%** |
| **Dakhliga Canshuuraha** | **24,339,550** | **21,822,131** | **12%** |
| Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka | 3,026,514 | 2,716,552 | 11% |
| Canshuurta Adeegga & Agabka | 5,555,127 | 4,380,065 | 27% |
| Canshuurta Ganacsiga Dibadda | 14,881,984 | 13,926,277 | 7% |
| Canshuuraha Kale | 875,924 | 799,237 | 10% |
| **Dakhliyada Kale** | **9,219,355** | **8,421,457** | **9%** |
| Dakhliga Hantida | 185,059 | 10,620 | 1643% |
| Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga | 8,981,101 | 8,370,661 | 7% |
| Ganaaxa, Ciqaabta | 53,195 | 40,176 | 32% |
| **DEEQAHA DIBADDA** | **152,909,486** | **27,388,420** | **458%** |
| Deeqaha laba dhinaclaha | 912,183 | 920,709 | -1% |
| Deeqaha Dhinacyada badan | 151,997,303 | 26,467,711 | 474% |

*Shaxda 2$^{aad}$: Dhabta Dakhliga Nov 2025 & 2024*

Sida ka muuqato shaxda 2$^{aad}$ dakhliga Dawladda ee la helay bish November 2025 ayaa ahaa $**186M**, wuxuuna ka badan yahay **224%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha November 2024. Dakhliga gudaha ayaa la helay **$34M**, wuxuuna ka badan yahay **11%** wadarta dakhliga gudaha ee la helay bisha November 2024. Halka deeqaha dibadda ay ka sareeyaan **458%** marka la barbardhigo deeqda Dawladdu heshay bisha November 2024.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bisha Nov 2025 dakhli dhan **$6M** wuxuuna ka badan yahay **27%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha November 2024. Kororka ugu badan ee canshuurtaan ayaa ka timid Canshuuraha Iibka ee la helay bisha Nov ee 2025. Sidoo kale waxaa kordhay Canshuuraha waddo marista iyo nootaayada.




*Jaantuska 1aad: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Nov 2025 & 2024*

Sida ka muuqata Jaantuska 1aad Dakhliga Gudaha ee la helay bisha November 2025 ayaa ah **$34M** wuxuuna ka badan yahay **$3M** dakhliga gudaha ee la helay bisha November 2024. Deeqaha dibadda ee la helay bisha November 2025 ayaa ah **$152M** waxayna ka badan tahay **$126M** deeqaha dibadda ee la helay bisha November 2024.

Deeqaha dibadda ayaa laga kala helay, Imaaraadka Carabta oo laga helay deeq dhan $**912K**, Bangiga Adduunka oo laga helay lacag ka badan **144M** iyo Bangiga Horumarinta Afrika oo laga healy $**3M.** Hay'adda Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada $**5M.**

## DAKHLIGA GUDAHA

Odoroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahayd **$430M**, waxaana la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025 dakhli dhan **$355M** oo u dhiganta **83%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2025 ayaa **6%** ka badan iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2024.




*Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Nov 2025 & 2024*

Sida ka muuqata jaantusta 2aad, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadaha 2025 iyo 2024.

Sida ka muuqaa jaantuska 2aad, dakhliga gudaha ayaa kordhay Bisha November ee sannadka 2025, wuxuuna ka badan yahay **11%** dakhliga gudaha ee la helay bisha November 2024.

Bilaha July, Augusto iyo Sabtember ee sannadka 2025 ayaa dakliga gudaha kordhay waxaana la helay Jul $35M, Aug $35M iyo Sep $36M oo ka badan 19%, 15% iyo 36% wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha July, August iyo September 2024. Bisha Oct 2025, dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay 2% marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee la helay bisha Oct 2024.

Saddex biloodlaha labaad ee sannadka 2025, dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay bilaha May iyo Jun 2025, wuxuuna hoos u dhacay bisha Jun 14%, May 8% marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee la helay isla bilahaas sannadka 2024. Bisha April kaliya ayuu kordhay dakliga gudaha waxaa la helay 14% ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha April 2024.

Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2025, dakhliga gudaha ayaa ka muuqda koror aad u yar marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan, Feb iyo Mar 2024. Bisha Maarso wuxuu kordhay 4%, bisha Febraayo 3%, halk bisha Janaayo uu kordhay wax yar 1%, marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee lahaly bilaa Maarso, Febraayo iyo Janaayo 2024.

Dakhliga gudaha ayaa laga kala helay dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Sida ka muuqato jaantuska 3$^{aad}$, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2025, wuxuu **72%** kasoo xarooday dakhliga canshuuraha, halka **28%** kasoo xarooday dakliyada kale.




*Jaantuska 3$^{aad}$: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Nov 2025*

Dakhliga canshuuraha ayaa ka soo xarooday canshuuraha kala duwan ay dawladdu qaado, waxaan ugu badan canshuurta kasoo xarooto dekada iyo garoonka diyaaraaha.

**DAKHLIGA CANSHUURAHA**

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeegga, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

| Faah-Faahin | Dhabta Dakhliga Jan-Nov 2025 | Dhabta Dakhliga Jan-Nov 2024 | Koror/Naaqus |
|---|---|---|---|
| **Dakhliga Gudaha** | **355,335,061** | **334,508,201** | **6%** |
| **Canshuuraha** | **254,839,377** | **240,249,728** | **6%** |
| Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka | 41,243,668 | 33,198,823 | 24% |
| Canshuurta Agabka & Adeegga | 62,314,710 | 45,726,176 | 36% |
| Canshuurta Ganacsiga Dibadda | 143,403,367 | 152,758,581 | -6% |
| Canshuuraha Kale | 7,877,633 | 8,566,149 | -8% |
| **Dakhliyada Kale** | **100,495,684** | **94,258,472** | **7%** |
| Dakhliga Hantida | 1,649,776 | 655,781 | 152% |
| Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga | 96,401,086 | 93,236,099 | 3% |
| Ganaaxa, Ciqaabta | 989,112 | 366,592 | 170% |
| Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay | 1,455,710 | - | 0% |

*Shaxda 3aad: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Nov ee sannadaha 2025 & 2024*

## CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay **16%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-Nov ee sannadka 2025. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo Canshuurta Faa'iidada shirkadaha.

Iskubiirinta Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa korortay **24%** ee bilaha Jan-Nov sannadka 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$41M**, halka bilaha Janaayo ilaa Nov ee sannadka 2024 la helay **$33M** oo ka hooseeyso canshuurta la helay sannadka 2025.

Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa Nov 2025 koror dhan **$5M** una dhiganta **62%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo ilaa Nov 2025. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **$1.2M** una dhiganta **15%** wadarta kororka la helay ee Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Mushaarka shaqaalaha ayaa la helay koror dhan **$1.9M** oo u dhiganta **23%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025.

## CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGGA

Waxaa la helay bilaha Jan-Nov dakhli dhan **$62M** oo ka badan **36%** iskubiirinta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2024. Waxayna ka tahay **24%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaana ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.

Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo suuqyada ayaa laga helay bilaha Janaayo ilaa November 2025 dakhli dhan **$54M** oo u dhiganta **86%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega. Canshuuraha Wado-marista iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **$9M** oo u dhiganta **14%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bilaha Jan-Nov 2025.

## CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdisho. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo xarooda gudaha dalka. Dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa Nov ee sannadka 2025 ayaa hoos u dhacay **6%** marka la barbardhigo wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2024.

Bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2025 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **$143M** oo u dhiganta **56%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, waxayna lasoo xareeyey **77%** wadarta odoroska miisaaniyad sannadeedka Dakhliga Gudaha ee 2025.

## CANSHUURAHA KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah **$15M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan-Nov 2025 dhakhli dhan **$8M** oo u dhiganta **53%** wadarta Dakhliga Canshuuraha kale ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga la helay bilaha Jan-Nov 2025 waxay ka tahay **3%** wadarta dakliga canshuuraha. Waxayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaarahadaha.

Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2025 ayaa **8%** hoos u dhacday marka la barbardhigo canshuuraha kale la helay bilaha Jan ilaa Nov ee sannadka 2024.




*Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-Nov 2025 & 2024*

Sida ka muuqato jaantuska 4aad oo soo bandhigaayo isbarbardhig qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Nov ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wuxuuna kaloo muujinayaa kororka iyo naaquska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigayo dakhliga canshuuraha la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadaha 2025 iyo 2024. Waxaana hoos u dhac ka muuqda Canshuuraha kale iyo Canshuuraha Ganacsiga Dibadda.

**DAKHLIYADA KALE**

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, adeegyada dekadda iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaana ka soo xarooday bilaha Janaayo ilaa November 2025 dakhli dhan **$100M** oo ka badan **7%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa Nov 2024.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Jan ilaa Nov 2025, waxaa **$40M** oo u dhiganta **40%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarooday adeegyada maamul Dawladda ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **$16M** oo u dhiganta **16%** wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay **$18M** oo u dhiganta **18%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **$4.6M** oo u dhiganta **5%** wadarta dakhliyada kale.

Sidoo kale dakhliga laga helay Dakhliga Hantida ee la helay bilaha Janaayo ilaa November ee sannadka 2025 ayaa ka badan **152%** dakhligii hantida ee la helay bilaha Jan ilaa Nov ee sannadka 2024. Sida ka muuqato shaxda 3$^{aad}$, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **170%** bilaha Jan ilaa Nov 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$989K** halka bilaha Jan ilaa Nov ee sannadka 2024 la helay dakhli dhan **$367K**. Khidmadaha iyo sheegashooyinka waxaa ka soo xarooday bilaha Jan-Nov 2025 dakhli dhan $**1.5M**, waa lacag ka soo xarootay caymiska abaaharaha ay horay dawladda u bixisay, hay'adda SODMA ayaa codsatay in dib loogu soo celiyo si waafaqsan heshiiska ay wada galeen shirkadda caysmiska iyo hay'adda SODMA.

**DEEQAHA DIBADDA**

Deeqaha Dibadda oo ka ah **68%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyadda Dawladda, waxaa la helay **$405M** oo u dhiganta **45%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025 ayaa hoos u dhacay **2%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Nov 2024. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **$387** kana badan **1%** deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa Nov 2024. Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay **$17.5M** oo ka yar **39%** wadarta deeqaha laba dhinacalaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2024.

| Faah-Faahin | Dhabta Dakhliga Jan-Nov 2025 | Dhabta Dakhliga Jan-Nov 2024 | Koror/Naaqus |
|---|---|---|---|
| **DEEQAHA DIBADDA** | 404,962,455 | 411,676,200 | -2% |
| Deeqaha laba dhinaclaha | 17,650,180 | 28,774,065 | -39% |
| Turkiga | 7,500,000 | 15,000,000 | -50% |
| Imaaraatka Carabta | 10,150,180 | 13,774,065 | -26% |
| Deeqaha Dhincacyada badan | 387,312,275 | 382,902,136 | 1% |
| Bangiga Adduunka | 349,178,172 | 360,626,808 | -3% |
| Bangiga Harumarinta Afrika | 12,994,913 | 5,863,502 | 122% |
| Midowga Yurub | 12,347,970 | 9,917,970 | 25% |
| Wadamada Dhoofiya Shidaalka (OPEC) | - | 3,030,000 | |
| Qaramada Midoobay | 1,963,558 | - | 0% |
| Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) | 10,827,663 | 3,463,856 | 213% |

*Shaxda 4$^{aad}$: Deeqaha Dibadda Jan-Nov 2025 iyo 2024*

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudahiisa.

Deeqaha labo dhinaclaha ah waxaa la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025 deeq dhan **$18M** oo **39%** ka hoosayso deeqaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2024. Dawladda Turkiga ayaa laga helay **$7.5M** oo u dhiganta **42%**, halka Imaaraadka Carabta laga helay **$10M** oo u dhiganta **58%** wadarta deeqaaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025.

Sida ka muuqato shaxda 4aad Deeqaha dhinacyadda badan ee la helay bilaha Jan ilaa November 2025 Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay **$349M** oo u dhiganta **90%,** Bangiga Harumarinta Afrika ayaa Dawladda ugu deeqday **$13M** una dhiganta **3%,** Midowga Yurub ayaa ayaa laga Helay Deeq dhan **13M** oo u dhiganto **3%,** Qaramada Midoobay ayaa laga helay deeq dhan **2M** una dhiganto **1%,** Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) aya Dawladda ugu deeqday **11M** una dhiganto **3%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa November 2025.

Sida ka muuqato jaantuska 5aad waxaa deeqaha dibadda ay kordheen bilaha, Nov, Sep, July, Mar, Feb, iyo Jan ee sannadk 2025, waxaana la helay deeq ka badan tan la helay bilaha la midka ah ee sannadka 2024. Bilaha Jan, Feb-Mar, Nov ayuu sameeyey kororkii ugu badan marka loo fiiriyo kororka boqolay ahaan.

Bilaha Oct, Aug, Jun, May, iyo Apr ee sannadka 2025 waxaa la helay deeq ka hosaysa deeqada la helay isla bilahaas ee sannadka 2024. Boqolay ahaan hoos u dhacii ugu badnaa wuxuu ahaa bilaha Aug iyo April ee sannadka 2025, wuxuuna hoos u dhacay 90% deeqdii la helay isla bilahaas ee sannadka 2024.




*Jaantuska 5aad: Deeqaha Dibadda Jan-Nov 2025 & 2024*

## DHABTA KHARASHAADKA JAN-NOV IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

| Faah-Faahin | Dhabta Kharashka Nov 2025 | Dhabta Kharashka Jan-Nov 2025 | Kutalagalka Dambe | Kutalagalka Hore | % Fulinta |
|---|---|---|---|---|---|
| **KHARASHKA GUUD** | **$104,258,205** | **$756,297,813** | **$ 1,359,714,328** | **$1,359,714,328** | **56%** |
| **Kharashaadka Joogtada** | **75,540,428** | **524,378,349** | **639,912,069** | **628,053,674** | **82%** |
| Mushaarka Shaqaalaha | 27,668,113 | 327,863,736 | 371,515,477 | 365,755,765 | 88% |
| Isticmaalka Agabka & Adeega | 13,161,788 | 104,918,378 | 137,462,896 | 139,587,608 | 76% |
| Dulsaarka | - | 5,344,428 | 8,141,862 | 13,800,000 | 66% |
| Kaalmo Dhaqaale | - | - | - | - | 0% |
| Deeqaha | 12,735,705 | 53,137,238 | 90,164,050 | 91,641,266 | 59% |
| Faa'idada Bulshada | - | - | - | - | 0% |
| Hantida aan Maaliyadda ahayn | 1,474,821 | 12,614,570 | 32,627,783 | 17,269,034 | 39% |
| Dib u bixin Daymaha/Horumaris | 20,500,000 | 20,500,000 | - | - | 0% |
| **Kharashaadka Mashaariicda** | **28,717,777** | **231,919,465** | **719,802,259** | **731,660,654** | **32%** |
| Mushaarka Shaqaalaha | 431,570 | 3,782,576 | 6,203,340 | 4,244,860 | 61% |
| Isticmaalka Agabka & Adeega | 10,319,514 | 90,854,917 | 261,307,109 | 256,865,498 | 35% |
| Kaalmo Dhaqaale | 800,000 | 9,207,926 | 13,177,722 | 13,280,000 | 70% |
| Deeqaha | 8,564,407 | 62,289,016 | 140,535,825 | 147,022,709 | 44% |
| Faa'idada Bulshada | - | - | 76,824,000 | 77,000,000 | 0% |
| Kharashaadka Kale | 3,776,233 | 34,639,896 | 63,444,328 | 68,416,928 | 55% |
| Hantida aan Maaliyadda ahayn | 4,826,053 | 31,145,135 | 158,309,934 | 164,830,659 | 20% |

*Shaxda 5aad: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Nov 2025,*

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo dakhliga gudaha iyo kabka miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiinta hawlaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maaligaliyaa kabka mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

**KHARASHKA BISHA NOEMBER 2025**

Sida ka muuqato shaxda 5aad waxaa la bixiyey bisha November 2025 kharash dhan **$104M.** kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **$76M** oo u dhiganta **72%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **$29M** oo u dhiganta **28%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha November 2025.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha November waxaana la bixiyey **$28M** oo u dhiganta **37%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$13M** oo u dhiganta **17%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha November 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa lagu bixiyey **$13M** oo **17%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha November 2025.

Kharashaadka mashaariicda ayaa la bixiyey bisha November 2025 kharash dhan **$29M** oo u dhiganta **28%** wadarta kharashaadka guud. Mushaarka shaqaalaha, kharashaadka la bixiyey bisha November waxaana la bixiyey **$436K** oo u dhiganta **2%** wadarta kharashaadka mashaaricda ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa lagu bixiyey **$10M** oo u dhiganta **36%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha November 2025.
Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **$9M** oo u dhiganta **30%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha November 2025.

## KHARASHAADKA GUUD JAN-NOV 2025

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025 ayaa aha **$756M** oo u dhiganta **56%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **$524M** oo u dhiganta **82%** miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, halka mashaariicda laga bixiyey **$232M** oo u dhiganta **32%** miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2025.

## KHARASHAADKA JOGTADA AH

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey **$328M** oo u dhiganta **88%** miisaaniyad sannadeedka Mushaarka shaqaalaha ee kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **63%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$105M** oo u dhiganta **76%** miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, wuxuuna **20%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iibsashadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey **$13M** oo u dhiganta **39%** misaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **2%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025.




*Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah, Bilaha Jan- Nov - 2025 & 2024*

Sida ka muuqato jaantuska 6aad oo soo bandhigaya isbarbardhig kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Nov ee sannadaha 2025 & 2024.

Bilaha Feb-July, Sep-Nov 2025 wuxuu muujinayaa jaantuska 6aad koror kharash bixinta ah ee la bixiyey sannadka 2025 marka la barbardhigo kharashaadka joogtada ee la bixiyey isla bilaha ee sannadka 2024. Kharashka ugu badan waxaa la bixiyey bisha Feb, wuxuuna ka badan 40% wadarta kharashaadka joogtada ah ee labixiyey bisha Feb 2024. Sidoo kale bisha Mar ayaa la diiwangaliyey koror dhan 28% marka la barabardhigo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Mar 2024. Sidoo kale bisha June iyo November ayaa la diiwangaliyey koror dhan **10%** marka la barabardhigo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha June iyo November 2024, sidoo kale

bisha Sep ayaa la diiwangaliyey koror dhan 12% marka la barabardhigo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Sep 2024.

Bisha Aug ayaa la diiwangaliyey hoos u dhac 1% marka la barabardhigo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Aug 2024.

Bisha Febraayo ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey **$55M** oo ka badan **40%** kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Febraayo 2024. Sidoo kale bisha Maarso 2025 waxaa la bixiyey **$58M** oo ka badan **28%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Maarso kharashaadka joogtada ee la bixiyey isla bilaha ee sannadka 2024.

## KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa November ayaa ahayd **$232M** oo u dhiganta **32%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Musharka Shaqalaha ayaa la bixiyey **$4M** oo u dhiganta **61%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **2%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$91M** oo u dhiganta **35%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **39%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025. Kharashaadka Kaalmo Dhaqale ayaa la bixiyey **$9M** oo u dhiganta **70%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **4%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa November 2025.




*Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaaciicda ah, Bilaha Jan-Nov- 2025 & 2024*

Sida ka muuqato jaantuska 7aad, oo isbarbardhig ku samaynayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November ee sannadaha 2025 & 2024. Bilaha Jan-Mar, May iyo Aug-Sep-Oct-Nov ee sannadka 2025, waxaa ka muuqda koror dhanka kharash bixinta mashaariicda, halka bilaha Apr, Jun iyo July ay ka muuqdaan hoos u dhac marka la barbardhigo bixinta kharashaadka mashaariicda ee isla bilaha ee sannadka 2024.

Bisha Mar ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey **$42M** oo ka badan **254%** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Mar 2024. Bisha May ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey **$17M** oo ka badan **18%** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2024. Bisha Aug ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey **$20M** oo ka badan **8%** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Aug 2024.

Sidoo kale bisha Sep ee sannadka 2025 ayaa labixiyey **$30M** oo ka badan **57%** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Sep ee sannadka 2024. Bisha Oct ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey **$16M** oo ka badan **21%** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Oct 2024. Bisha Nov ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey **$29M** oo ka badan **23%** kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Nov 2024

Bisha Apr ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey **$4M** oo ka hoosaysa **90%** khaarashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bisha Apr ee sannadka 2024. Sidoo kale bisha Jun ee sannadka 2025 ayaa bixiyey **48M** oo ka hooseeya **38%** wadarta kharashaadka mashriicda ee la bixiye bisha Jun 2024. Sidoo kale bisha July ee sannadka 2025 ayaa bixiyey **18M** oo ka hooseeya **25%** wadarta kharashaadka mashriicda ee la bixiyey bisha July 2024.

## ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BISHA NOVEMBER EE 2025 & 2024

| Faahfaahin | Dhabta Kharashka November 2025 | Dhabta Kharashka November 2024 | Koror/Naaqus |
|---|---|---|---|
| **Wadarta Kharashaadka Guud** | **104,258,205** | **92,241,302** | **13%** |
| **Kharashaadka Joogtada** | **75,540,428** | **68,828,923** | **10%** |
| Mushaarka Shaqaalaha | 27,668,113 | 26,812,370 | 3% |
| Isticmaalka Agabka & Adeega | 13,161,788 | 10,196,951 | 29% |
| Dulsaarka | - | 1,198,623 | -100% |
| Kaalmo Dhaqaale | - | - | 0% |
| Deeqaha | 12,735,705 | 30,164,791 | -58% |
| Faa'idada Bulshada | - | - | 0% |
| Hantida aan Maaliyadda Ahayn | 1,474,821 | 456,188 | 223% |
| Dib u bixin Daymaha/Horumaris | 20,500,000 | - | 0% |
| **Kharashaadka Mashaariicda** | **28,717,777** | **23,412,379** | **23%** |
| Mushaarka Shaqaalaha | 431,570 | 224,650 | 92% |
| Isticmaalka Agabka & Adeega | 10,319,514 | 12,175,822 | -15% |
| Kaalmo Dhaqaale | 800,000 | 92,633 | 764% |
| Deeqaha | 8,564,407 | 4,258,753 | 101% |
| Faa'iidada Bulshada | - | 4,500,000 | -100% |
| Other Expenses | 3,776,233 | - | 0% |
| Hantida aan Maaliyadda Ahayn | 4,826,053 | 2,160,522 | 123% |

*Shaxda 6$^{aad}$: Kharashaadka la bixiyey Bisha November 2025 iyo 2024*

Sida ka muuqato shaxda 6$^{aad}$ oo isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha November ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa kordhay **13%** bisha November 2025 marka la barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha November ee sannadka 2024.

Wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha November 2025 ayaa korortay **10%** marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha November ee sannadka 2024. Kharashaadka mashariicda ayaa la bixiyey **$29M** waxayna **23%** ka saraysaa wadarta kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bisha November 2024.

Kharashaadka joogtada, Mushaarka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha November 2025 ayaa ahayd **$28M** oo **3%** oo ka saraysa kharashaadka joogtada ee mushaarka shaqalaha ee la bixiyey bisha November 2024. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha November 2025 ayaa ahaa **$13M** wuxuuna **29%** ka sareeyaa kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha November 2024.

Dhammaan kharashaadka mashaariicda ayaa kordhay marka laga reebo kharashaadka Agab iyi Adeegg iyo Faa'iidada Bulshada ee la bixiyey bisha November 2025, marka labarbardhigo kharashaadkii la bixiyey bisha November 2024. Kharashadka Kaalmo Dhaqaale ayaa kordhay **764%,** sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad goboleeyada ayaa kordhay **101%,** marka la barbardhigo kharashaadka deeqaha ee la bixiyey bisha November 2024.

**ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BILAHA JAN-NOV EE 2025 & 2024**

| Faahfaahin | Dhabta Kharashka Jan- November 2025 | Dhabta Kharashka Jan- November 2024 | Koror/Naaqus |
|---|---|---|---|
| **Wadarta Kharashaadka Guud** | **756,297,813** | **723,515,725** | **0.05** |
| **Kharashaadka Joogtada** | **524,378,349** | **477,529,002** | **10%** |
| Mushaarka Shaqaalaha | 327,863,736 | 304,452,514 | 8% |
| Isticmaalka Agabka & Adeega | 104,918,378 | 94,764,581 | 11% |
| Dulsaarka | 5,344,428 | 4,097,126 | 30% |
| Kabka | - | - | 0% |
| Deeqaha | 53,137,238 | 72,562,112 | -27% |
| Faa'idada Bulshada | - | - | 0% |
| Hantida aan Maaliyadda Ahayn | 12,614,570 | 1,652,668 | 663% |
| Dib u bixin Daymaha/Horumaris | 20,500,000 | - | 0% |
| **Kharashaadka Mashaariicda** | **231,919,465** | **245,986,723** | **-6%** |
| Mushaarka Shaqaalaha | 3,782,576 | 2,779,629 | 36% |
| Isticmaalka Agabka & Adeega | 90,854,917 | 68,087,193 | 33% |
| Kabka | 9,207,926 | 5,567,766 | 65% |
| Deeqaha | 62,289,016 | 56,529,019 | 10% |
| Faa'idada Bulshada | - | 97,206,551 | -100% |
| Other expenses | 34,639,896 | - | 0% |
| Hantida aan Maaliyadda ahayn | 31,145,135 | 15,816,563 | 97% |

*Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- Nov 2025 & 2024*

Iskudarka kharashaadka Guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025 ayaa wax yar ka badan kharshaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo November 2024. Kharashaadka joogtada ah ayaa kordhay **10%,** halka kharashaadka mashaariicda ay hoos u dhaceen **6%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2024.

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey **$328M** bilaha Janaayo ilaa November 2025 wuxuuna kordhay **8%** marka la barbardhigo Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2024. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$105M** wuxuuna ka badan yahay **11%** kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2024. Sidoo kale soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa aad u korortay bilaha Janaayo ilaa November 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **$232M** bilaha Jan-Nov 2025, wuxuuna ka hooseeyaa **6%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan-Nov 2024. Waxaa kororka ugu badan sameeyey kharashadka soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn oo gaaray koror dhan **97%** marka la barbardhigo kharashaadkkii soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2024.

Sidoo kale waxaa kordhay **65%** kharashaadka kabka ee laga bixiyey kharashaadka mashaariicda ee bilaha Jan-Nov 2025, marka la barbardhigo kharashaadka kabka ee la bixiyey bilaha Jan ilaa November 2024.

### DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN-NOV, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8$^{aad}$ waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud ee Dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025, iyadoo loo kala saarayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Janaayo ilaa November 2025, waxaa la bixiyey kharash dhan **$756M** oo u dhigma **56%** wadarta miisaaniyad sanadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

| Faah-faahinta | Dhabta Kharashka November 2025 | Dhabta Kharashka Jan-Nov 2025 | Kutalagalka Danbe | Kutalagalka Hore | % Fulinta |
|---|---|---|---|---|---|
| **KHARASHKA GUUD** | **$ 104,250,705** | **$ 756,290,313** | **1,359,714,328** | **1,359,714,328** | **56%** |
| **Kharashaadka Joogtada** | **75,540,428** | **524,378,349** | **639,912,069** | **628,053,674** | **82%** |
| Hay'adaha Adeeg Maamulka | 49,083,794 | 223,211,422 | 274,126,489 | 273,973,094 | 81% |
| Hay'adaha Adeeg Amniga | 20,698,707 | 230,538,732 | 268,732,431 | 257,147,965 | 86% |
| Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha | 2,536,987 | 32,286,178 | 45,215,916 | 45,127,551 | 71% |
| Hay'adaha Adeeg Bulshada | 3,220,940 | 38,342,016 | 51,837,232 | 51,805,063 | 74% |
| **Kharashaadka Mashaariicda** | **28,710,277** | **231,919,465** | **719,802,259** | **731,660,654** | **32%** |
| Hay'adaha Adeeg Maamulka | 8,266,104 | 83,979,789 | 156,074,021 | 164,634,351 | 54% |
| Hay'adaha Adeeg Amniga | - | - | - | - | 0% |
| Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha | 8,404,960 | 80,969,594 | 286,207,948 | 289,506,013 | 28% |
| Hay'daha Adeeg Bulshada | 12,039,213 | 66,970,082 | 277,520,289 | 277,520,289 | 24% |

*Shaxda 8$^{aad}$: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda*

### KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan ee la bixiyey waxaa laga bixiyey miisaaniydda kharshaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **$524M** oo u dhiganta **82%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025. Kharashaadka joogtada ee la bixiye ayaa ka ahaa **69%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025.

Iskudarka bilaha Janaayo ilaa November ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **$231M** oo u dhiganta **86%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa laga bixiyey **$223M** oo u dhiganta **81%** miisaaniyad sannadeedka kharshaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **$32M** oo u dhiganta **71%,** Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **$38M** oo u dhiganta **74%** miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiye bilaha Janaayo ilaa November 2025 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Amniga, waxaana ku baxday, **$231M** oo **44%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa

November 2025. Hay'adaha maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday **$223M** oo **43%** wadarta kharashaadka joogtada ah, Ha'aydada Bulshada ayaa lagu bixiyey **$38M** oo **7%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah, halka Hay'adaha dhaqaalaha lagu bixiyey **$32M** oo **6%** ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025.

**KHARASHAADKA MASHAARIICDA**

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey **$232M** oo u dhiganta **32%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **31%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa November 2025.

Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **$84M** oo u dhiganta **54%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada hay'adaha dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **$81M** oo u dhiganta **28%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **$67M** oo u dhiganta **24%** miisaaniyadda mashaariicda ee haya'daha bulsha.

# DHAMMAAD

## Lifaaqa 1aad: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Nov

| Code | Faahfaahin | Dhabta Jan-Nov | Kutalagalka Danbe | Kutalagalak Hore | % Fulinta Kutalagalka Danbe |
|---|---|---|---|---|---|
| **010100** | **Xafiiska Madaxtooyada** | **10,520,087** | **12,678,126** | **12,529,086** | **83%** |
| **21** | **Mushaarka Shaqaalaha** | **5,535,217** | **6,547,992** | **6,662,112** | **85%** |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | 874,348 | 956,763 | 1,012,068 | 91% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 4,613,169 | 5,533,989 | 5,592,804 | 83% |
| 2114 | Kharshaadka kale ee Shaqaalaha | 47,700 | 57,240 | 57,240 | 83% |
| **22** | **Isticmaalka Agabka iyo Adeegga** | **4,984,870** | **6,130,134** | **5,834,203** | **81%** |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | 1,296,311 | 1,635,000 | 1,425,000 | 79% |
| 2221 | Hawlaha Guud | 269,570 | 323,492 | 323,492 | 83% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | 614,940 | 737,959 | 737,959 | 83% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | 15,580 | 18,700 | 18,700 | 83% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | 36,000 | 36,000 | 36,000 | 100% |
| 2231 | Kirooyin | 50,000 | 80,000 | 60,000 | 63% |
| 2242 | Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta | 1,884,300 | 2,274,360 | 2,251,200 | 83% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | 818,169 | 1,024,623 | 981,852 | 80% |
| **26** | **Deeqaha** | **-** | **-** | **32,771** | **0%** |
| 2621 | Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah | - | - | 32,771 | 0% |
| **010201** | **Xafiiska Golaha Shacabka** | **24,748,619** | **28,014,021** | **27,893,681** | **88%** |
| **21** | **Mushaarka Shaqaalaha** | **20,342,700** | **22,419,330** | **22,363,440** | **91%** |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | 1,983,405 | 2,151,420 | 2,095,620 | 92% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 18,359,295 | 20,267,910 | 20,267,820 | 91% |
| **22** | **Isticmaalka Agabka iyo Adeegga** | **3,833,046** | **4,558,926** | **4,494,476** | **84%** |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | 627,210 | 764,450 | 720,000 | 82% |
| 2221 | Hawlaha Guud | 245,947 | 295,250 | 295,250 | 83% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | 409,600 | 491,520 | 491,520 | 83% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | 215,993 | 255,200 | 235,200 | 85% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | 209,596 | 251,526 | 251,526 | 83% |
| 2231 | Kirooyin | 243,600 | 243,600 | 243,600 | 100% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | 1,881,100 | 2,257,380 | 2,257,380 | 83% |
| **31** | **Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn** | **572,874** | **1,035,765** | **1,035,765** | **55%** |
| 3113 | Hantida kale ee Maguurtada ah | 572,874 | 1,035,765 | 1,035,765 | 55% |

| Code | Faahfaahin | Dhabta Jan-Nov | Kutalagalka Danbe | Kutalagalak Hore | % Fulinta Kutalagalka Danbe |
|---|---|---|---|---|---|
| **010202** | **Xafiiska Aqalka Sare** | **6,406,287** | **8,028,246** | **7,973,196** | **80%** |
| **21** | **Mushaarka Shaqaalaha** | **4,243,175** | **4,723,296** | **4,723,296** | **90%** |
| 2111 | Mushaarka - Lacag Cadaan ah | 132,450 | 161,280 | 161,280 | 82% |
| 2113 | Gunnoyin Lacag Cadaan ah | 4,110,725 | 4,562,016 | 4,562,016 | 90% |
| **22** | **Isticmaalka Agabka iyo Adeegga** | **1,929,000** | **2,285,950** | **2,245,900** | **84%** |
| 2211 | Kharashka Safarka iyo Shirarka | 208,250 | 211,850 | 196,800 | 98% |
| 2221 | Hawlaha Guud | 121,250 | 147,600 | 147,600 | 82% |
| 2223 | Shidaalka iyo Saliidaha | 222,500 | 267,000 | 267,000 | 83% |
| 2224 | Agabka iyo Alaabaha | 246,000 | 299,200 | 259,200 | 82% |
| 2225 | Dayactir iyo Hagaajin | 15,000 | 21,000 | 36,000 | 71% |
| 2231 | Kirooyin | 162,000 | 194,400 | 194,400 | 83% |
| 2261 | Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada | 954,000 | 1,144,900 | 1,144,900 | 83% |
| **31** | **Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn** | **234,112** | **1,019,000** | **1,004,000** | **23%** |
| 3111 | Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka | 49,238 | 834,100 | 900,000 | 6% |
